Washington State Health Care Authority

# Codsiga adeegyada Qosheynta Qoyska oo Keliya

| | |
|---|---|
| **Miyaad xaq u leedahay barnaamijyada Qorsheynta Qoyska oo Keliya (FPO)?** | Barnaamijyada FPO waxaa heli kara dadka deggan gobolka Washington oo dakhligoodu le'eg yahay ama ka yar yahay 260% ee heerka saboolnimada federaalka (FPL), iyada oo aan la tixelinayn jinsiga iyo xaaladda socdaalka, kuwaas oo aan xaq u laheyn barnaamijyada Apple Health ee baaxadoodu dhan tahay oo aan lahayn caymiska kale oo caafimaadka ah. Macaamiisha caynsan ee raadinaya adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah ayaa codsan kara barnaamijyada FPO. |
| **Waa maxay dheefaha la caymiyay?** | Dheefaha waxaa ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn:<br>• Booqashada ka hortagga ah ee qorsheynta qoyska oo dhammeystiran<br>• La-talin, waxbarasho, bilaabidda iyo maareynta xakameynta dhalmada iyo hababka ka hortagga dhalmada<br>• Baaritaanka kaansarka la xiriira marinka minka<br>• Baarista iyo daaweynta qaar ka mid ah cudurrada galmada la isugu gudbiyo (STD) iyo caabuqa galmada la isugu gudbiyo (STI)<br>• Daawooyinka ka hortagga uurka ee la isu qoro iyo kuwa aan la isu qorin<br>• Habraacyada ma dhalays ka dhigidda qofka |
| **Sideed u codsaneysaa?** | Waxaad waqti kasta ka codsan kartaa barnaamijyada FPO, adeeg bixiyaha aqbala Apple Health. |
| **Sideed u buuxinaysaa qaybta 1?** | Qaybtan waa in loo buuxiyaa si dhammeystiran, iyada oo si fiican u ogyahay codsadaha. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan su'aalo gaar ah oo ku jira qaybta 1aad ee codsiga ayaa goor dambe lagu bixiyaa dokumentigan. |
| **Ma jiraan adeegyo luuqadeed ama naafonimo oo la heli karo marka la codsanayo?** | Si aad u hesho caawimaad bilaash ah oo luuqado kale ah (oo ay ku jiraan turjubaan ama qoraallo daabacan oo la tartumay) ama diyaafadinta dadka naafada ah, wac 1-800-562-3022. |
| **Ma adeegsan kartaa Wakiil Idman (AREP) oo kuu codsanaya?** | Wakiilka Idman (AREP) waa qof kastoo weyn oo si fiican ula socda duruufaha reerka oo reerkana u idmay in uu wakiil ugu noqdo ujeeddooyinka xaq-u-yeelashada reerka. Kani wuxuu ka duwan yahay iskaashiga lala yeesho Hage ama Dilaal. |
| **Waa maxay shuruudaha dakhliga?** | Dakhligu waa in uu ka hooseeyaa ama noqdaa 260% ee Heerka Saboolnimada Federaalka. Booqo **hca.wa.gov/family-planning si aad u hesho macluumaad dheeraad ah**. |
| **Sidee loo go'aamiyaa inta ay le'eg yihiin reeraha?** | Inta uu reerka le'eg yahay ayaa la go'aamiyaa iyada oo lagu saleynayo xaaladda xareynta canshuurta. Xubinka reerka ka tirsan waa lammaanaha ama ku-tiirsanaha uu codsadaha la xareeyo canshuurta ama u sheegto ku-tiirsane canshuur ahaan. Haddii aadan canshuuro xareynayn, xubinka ka tirsan qoyska waa lammaanaha ama ku tiirsanaha kugula nool isla guriga. |
| **Miyaa laguu tixgeliyaa in aad deggan tahay gobolka Washington?** | Dadka deggan gobolka Washington waa kuwa hadda la joogo ku nool doonayana in ay sii degganaadaan Washington, ama soo galey gobolka iyaga oo shaqo raadis ah ama u soo galey gobolka ballanqaad shaqo. |
| **Ka waran haddii aad u baahan tahay adeegyo qarsoodi ah?** | Shakhsiyaadka caynsan waxaa ay xaq u yeellan karaan adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah, haddii aad ka soo baxdo mid ka midan ka-reebisyada: raadinaya adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah waxaanna ahay 18 sano jir ama ka yar; AMA waxaad tahay dhibbanaha rabshadaha guriga waxaanna ku caymiya caafimaadka qofka kugu xadgudbay. |
| **Ka waran haddii aad leedahay caymis kale?** | Xaq uma lihid adeegyada qorsheynta qoyska (FPO) haddii aad leedahay caymis kale, haddii aad raadinayso adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah mooyaane. |

| | |
|---|---|
| **Sidee ayuu Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) u adeegsadaa Lambarkaaga Dammaanada Bulshada (SSN) ama macluumaadka xaaladda socdaalka?** | Maamulka HCA wuxuu adeegsanayaa macluumaadkan si uu u go'aamiyo xaq-u-yeelashadaada isaga oo xaqiijinaya aqoonsigaaga, muwaadinimadaada, xaalkaaga socdaalka, taariikhdaada dhalashada, iyo helitaanka caymiska kale ee daryeelka caafimaad. Maamulka HCA lama wadaago macluumaadkan wax hay'ad socdaal ah.<br><br>Haddii aadan haysan SSN ama lambarka dokumentiga socdaalka, goobahaas isaga tag iyaga oo bannaan. |
| **Waa maxay Apple Health (Medicaid) baaxadda-buuxda oo ma tahay in aad ka tanaasusho xaqa aad u leedahay in aad codsato?** | Haddii aad xaq u leedahay Apple Health ee baaxadda-buuxa, waxaad xaq u leedahay dhammaan dheefaha khasabka ah sida cusbitaalka bukaan-jiifka iyo bukaan-socodka, caafimaadka guriga, iyo adeegyada takhtarka, iyo kuwo kale iyo dheefo ikhtiyaari ah sida daawooyin la isu qoro, adeegyada ilkaha, iyo daaweynta jirka. Dantaada ugu wanaagsan ayaa ku jirta in aad codsato Apple Health (Medicaid) baaxadda-buuxda ah si aad u hesho caymiska dheefaha caafimaadka ee ugu badan ee aad xaq u yeellan karto.<br>Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Apple Health baaxadda-buuxda, booqo **https://www.hca.wa.gov/health-care-services-supports/apple-health-medicaid-coverage**. |
| **Ma la heli karaa macluumaadka diiwaangelinta cod-bixiyaha?** | Xeerka Diiwaangelinta Cod-bixiyaha ee Qaranka ee 1973 ayaa ugu baahan gobollada oo dhan in ay bixiyaan diiwaangelinta cod-bixiyaha iyada oo loo marayo xafiisyadooda caawimaadda dadweynaha. Codsashada ama diidista in la is diiwaangeliyo si loo codeeyo **ma** saameyn doonto adeegyada ama dheefaha ay bixiso hay'addan. Waxaad iska diiwaangelin kartaa si aad u codeyso vote.wa.gov ama dalbo foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha adiga oo wacaya 1-800-448-4881. |
| **Sidee ayaad u oggaan kartaa goormee ayaadna oggaan kartaa xaaladda codsigaaga?** | Codsiyada ayaa hawshooda la socodsiiyaa iyada oo la raacayo sida loo kala hor helay 45 maalmood gudahooda. Haddii macluumaad dheeraad ah loo baahan yahay, codsadayaan waxaa lagala soo xiriiri doonaa telefoonka iyo/ama iimayl. Marka laga baraandego, warqad diidmo ama oggolaansho ayaa loogu soo dirayaa boostada. Adeeg-bixiyeyaasha qaarkood waxay bixin karaan adeegyada inta aad sugeyso soo gudbinta iyo ka-baraandegidda codsigaaga. |
| **Miyaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aaminta xaq-u-yeelashada?** | Haa, waxaad rafcaan ka qaadan kartaa 90 maalmood gudahooda haddii aadan oggolayn go'aanka uu gaarey maamulka HCA, Washington Healthplanfinder or the Department of Social and Health Services (DSHS) that affects your eligibility for health coverage. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka rafcaannada, booqo hca.wa.gov/about-hca/file-appeal-apple-health-medicaid. |
| **Waa maxay adeegyada qorsheynta qoyska kale ee laga heli karo Gobolka Washington?** | Shabakada Qorsheynta Qoyska ee Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington waxaa ay bixisaa adeegyada qorsheynta qoyska oo kala duwan. Heli macluumaad dheeraad ah, adiga oo booqanaya doh.wa.gov/YouandYourFamily/FamilyPlanning/FullRangeofServices. |
| **Waa maxay ikhtiyaarada kale ee caynsanaanta ee laga heli karo Gobolka Washington?** | Eeg barnaamijyada kale ee Washington Apple Health ee la heli karo, oo ay ka mid yihiin adeegyada loogu talagalay muhaajiriinta aan xaqa u laheyn iyo kuwa sharci-darrada ku jooga dalka, iyo daryeelka uurka la xiriira adiga oo booqanaya hca.wa.gov/apple-health. |
| **Halkeed ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah?** | Macluumaad dheeri ah ayaa laga heli karaa hca.wa.gov/family-planning. |

Washington State Health Care Authority

# Codsiga adeegyada Qosheynta Qoyska oo Keliya

Hadda miyaad uur leedahay? ☐ Haa ☐ Maya haddii aad Haa ku jawaabtey, xaq uma lihid adeegyada qorsheynta qoyska, balse waxaad xaq u yeelan kartaa caymis caafimaad. Bartan internet-ka ka codso **wahealthplanfinder.org**

**Marka aad buuxiso codsigan, waxaad ku qireysaa in aad codsaneyso adeegyada qorsheynta qoyska oo keliya.**

## 1. Macluumaadka Codsadaha iyo Xiriirka

Magaca koowaad (isticmaal magacaaga sharciga ah oo dhammeystiran) ____ Xarafka hore ee magaca dhexe ____ Magaca Dambe ____

☐ Lab ☐ Dheddig

Taariikhda Dhalashada ____

Lambarka Dammaanada Bulshada ____

Ma Deggan Tahay Washington? ☐ Haa ☐ Maya

Cinwaanka halka aad ku nooshahay ____ Lr. Guriga ____ Magaalada ____ Gobolka ____ Koodhka Degaanka ____

Cinwaanka boostada ____ Lr. Guriga ____ Magaalada ____ Gobolka ____ Koodhka Degaanka ____

Guriga/telefoonka gacanta/lambarka la doorbidayo ____

Lambarka farriimaha/shaqada ____

Miyaan kaala soo xiriiri karnaa lambarrada telefoonka aad bixisay? ☐ Haa ☐ Maya

Ciwaanka emailka ____

Dhibaato ma ku qabtaa ku hadalka, akhrinta, ama qorista Af Ingiriiska ☐ Haa ☐ Maya

Ma u baahan tahay turjubaan? ☐ Haa ☐ Maya Waa maxay luuqadda aad ku hadasho? ____

Ma leedahay Caymis caafimaad oo gaar loo leeyahay ama caymiska Apple Health (Medicaid)? ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii aad Haa ku jawaabtey**, xaq uma lihid adeegyada qorsheynta qoyska haddii aad ka soo baxdo mid ka mid ah xaaladahan hoos ku xusan ee ka reeban mooyaane:

☐ Waxaan raadinaynaa adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah waxaanna ahay qof 18 sano jir ah ama ka yar;

AMA

☐ Waxaan ahay dhibbanaha rabshad qoys waxaanna i caymiya caymiska caafimaadka ee qofkii igu xadgudbay.

*(u gudub qaybta (2) haddii aad calaamadeysay sanduuqyada kor ku xusan midkood)*

30-kii maalmood ee ugu dambeeyay gudahooda, miyaa laguu diiday caymiska baaxadda-buuxa ee Apple Health (Medicaid) iyada oo loo marayo **wahealthplanfinder.org**? ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii ay Haa tahay,** halkan ku jooji ka-dibna u gudub qaybta (9). IHaddii qoyskaagu uu soo marey wax isbeddelo ah, maadaama laguu diiday caymiska Apple Health (Medicaid), u gudub qaybta (2) si aad u dhammeystirto codsigaaga.

Haddii ay Maya tahay, waa in aad caymis ka codsato **wahealthplanfinder.org** (*haddii aad ka soo baxdo mid ka mid ah labada xaaladood ee ka reeban ee kor ku xusan mooyaane ama aad sameynayso doorasho aad xog ogaal u tahay ahna in aadan codsan caymiska Apple Health (Medicaid) oo baaxad-buuxda ah*).

☐ **Waxaan doortey in aan codsado caymiska qorsheynta qoyska oo keliya waxaanna sameynayaa doorasho aan xog ogaal u ahay ahna in aanan codsan Apple Health (Medicaid) oo baaxad-buuxda ah.**

## 2. Xaaladda Muwaadinnimada iyo Socdaalka

Xaaladda Muwaadinka ama Aan Muwaadin Ahayn (mid calaamadee):

☐ Muwaadin Mareykan ah ama U-dhashey Mareykanka ☐ Muwaadinka aan Mareykanka ahayn ee sida sharciga ah ku jooga Mareykanka. ☐ Kuwo kale

Haddii aad tahay qof si sharci ah ku jooga oo aan muwaadin ahayn, geli macluumaadkan soo socda:

| Nooca dokumentiga socdaalka | Lambarka "A" | Lambarka rasiidka ama lambarka kale |
|---|---|---|
| | | |

| Lambarka baasaboorka ajnabiga ah | Dalka deganaanshaha | Taariikhda soo gelidda | Taariikhda uu dhacayo dokumentiga |
|---|---|---|---|
| | | | |

## 3. Dakhliga Shaqada / Iskaa-u-shaqeysiga

**Aad adiga kasbatay**

**Magaca loo shaqeeyaha hadda (Shaqada 1aad)** ________ **Lambarka Telefoonka** ________

**Dakhliga guud ee canshuuraha ka hor** ________ Iskaa-u-shaqeysata? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

*(iyo/ama dakhliga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)*

**Magaca loo shaqeeyaha hadda (Shaqada 2aad)** ________ **Lambarka Telefoonka** ________

**Dakhliga guud ee canshuuraha ka hor** ________ Iskaa-u-shaqeysata? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

*(iyo/ama dakhliga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)*

**Ay kasbadeen xubnaha kale ee reerka**

**Magaca loo shaqeeyaha hadda (Shaqada 1aad)** ________ **Lambarka Telefoonka** ________

**Dakhliga guud ee canshuuraha ka hor** ________ Iskaa-u-shaqeysata? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

*(iyo/ama dakhliga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)*

**Magaca loo shaqeeyaha hadda (Shaqada 2aad)** ________ **Lambarka Telefoonka** ________

**Dakhliga guud ee canshuuraha ka hor** ________ Iskaa-u-shaqeysata? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

*(iyo/ama dakhliga bilaha ee saafiga ah ee loogu talagalay iskaa-u-shaqeysiga)*

Haddii xubin ka tirsan reerka uu hadda leeyahay in ka badan laba loo-shaqeeyayaal, ku soo lifaaq warqad kale oo gaar ah. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo soo sheego dakhliga, booqo **wahbexchange.org/how-to-report-income**.

## 4. Dakhliga Kale ee Reerka

| | **Qadarka bil kasta:** | **Kumaa hela dakhligan:** |
|---|---|---|
| ☐ Masruuf/taageero lammaane | | |
| ☐ Kiro, iyo/ama dakhliga adeegsiga hantidaada (saafi) | | |
| ☐ Dheefaha Dammaanada Bulshada/Hawlgabka Waddada Tareenka | | |
| ☐ Shaqo la'aan | | |
| ☐ Dakhliga hawlgabka, oo uu ku jiro: lacagta dowladda siiso dadka aan shaqeyn, lacagta sannadlaha ah, iyo/ama qaybinta IRA | | |
| ☐ Saami loo helo qayb, saami faa'iido, saamiyada shirkadaha, faa'iidooyinka raasumaalka ah, dakhliga dibedda, amaanada/ dakhliga kale ee maalgashiga | | |
| ☐ Dakhliga qabiilka ee la canshuuri karo | | |
| ☐ Dakhliga beeraha iyo kalluumeysiga (saafi) | | |
| ☐ Dakhliga kale ee la canshuuri karo | | |

## 5. Lacagaha Laga Jaro Reerka

| | Dakhliga bilaha ah: | Kumaa bixinaya kani: |
|---|---|---|
| ☐ Masruuf/taageero lammaane LA BIXIYAY | ____ | ____ |
| ☐ Tabarrucaad/tabarrucaadaha xisaabta hawlgabka cashuurta ka hor ama IRA | ____ | ____ |
| ☐ Lacag-bixinnada dulsaarka amaahda ardayga | ____ | ____ |
| ☐ Kharashaadka guuritaanka ee loogu talagay xubnaha ka tirsan ciidamada qalabka sida | ____ | ____ |
| ☐ Kharashaadka baraha | ____ | ____ |
| ☐ Tabarrucaadaha xisaabta kaydka ee caafimaadka | ____ | ____ |
| ☐ Ciqaabta la soo bixidda waqtiga hore ah ee kaydka | ____ | ____ |
| ☐ Kharashaad ganacsi gaar ah oo la sheegan karo | ____ | ____ |

## 6. Xaaladda Xareynta Canshuurta

Maxay noqon kartaa xaaladda xareyntaada cashuurta ee sannadkan? ☐ Xareeye keli ah ☐ Guursadey Si Kala-gooni ah u Xareynaya ☐ Guursadey Si Wadajir ah u Xareynaya

☐ Ku-tiirsanaha Canshuurta Qof Ka Socda Reerka ☐ Ku-tiirsanaha Canshuurta Qof Ka Baxsan Reerka ☐ Xareeyaha Canshuur-laawaha ah

Sharci ahaan ma u guursatey?
☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay haa tahay, magaca sharciga ah ee dhammeystiran ee lammaanahaaga ____________________
magaca koowaad, dhexe, dambe

Haddii aad xareyso canshuur celin, immisa canshuur ku tiirsanayaal ah ayaad sheegataa? ______

Haddii kale, immisa carruur ah ayaad haysataa? ______

## 7. Shaqo Lumin Dhowaan ah

Miyaad isaga tagtey ama lumisay shaqo 90kii maalmood ee ugu dambeeyay?
☐ **Haa** ☐ **Maya**

**Haddii ay haa tahay, magaca ganacsiga:** ____________________

**Taariikhda ay shaqadu dhammaatey:** ____________________

Lammaanahaaga miyuu isaga tagey ama lumiyay shaqo 90kii maalmood ee ugu dambeeyay?
☐ **Haa** ☐ **Maya**

**Haddii ay haa tahay, magaca ganacsiga:** ____________________

**Taariikhda ay shaqadu dhammaatey:** ____________________

## 8. Asalka Isirka/Qowmiyadda

Waxaan ku weyddiisaneynaa in aad si ikhtiyaari ah noogu sheegto asalka isirkaaga ama qowmiyadaada. Macluumaadkan looma adeegsan doono in lagu tixgeliyo xaq-u-yeelashadaada adeegyada.

☐ Caddaan ☐ Madow ama Afrikaanka Mareykan ah ☐ Fiitnaameed/Laatiyaan/Kamboodhiyan

☐ Isbaanish ☐ Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Dhallad ah ☐ Aasiyaan Kale ama Jasiiradle Baasifik ah

Kale: ____________________ Magaca qabiilka: ____________________

## 9. Si Taxaddar leh u Akhri Ka Hor Inta Aadan Hoos Saxiixin

Waxaan fahamsanahay in:

- HCA ayaa i weyddiin karta in aan soo caddeeyo macluumaadka aan bixiyo. HCA ayaa igu caawin karta in aan helo caddeynta ama in aan kala xiriirro hay'adaha ama shakhsiyaadka kale.
- Macluumaadkeyga waxaa dib-u-eegi kara hay'adaha kale ee gobolka ama federaalka. Macluumaadkan lala MA wadaagi doona Adeegyada Socdaalka iyo Kastamka ee Mareykanka (USCIS).
- Marka aad weyddiisato ama aad hesho kaalmada caymiska caafimaadka, waxaan u xilsaarayaa gobolka Washington dhammaan xuquuqaha taageero caafimaad kasta iyo lacag-bixinnada cid saddexaad kasta ee loogu talagalay daryeelka caafimaad.
- Waxaan fahamsanahay in codsigan loogu talagalay adeegyada qorsheynta qoyska si looga hortago uurka keliya. Haddii aan u baahanahay kaalmo kale oo caafimaad, waxaan ka codsan karaa Washington Healthplanfinder (**wahealthplanfinder.org**). Haddii aan u baahannahay kaalmo dhaqaale ama kaarar cunto, waxaan ka codsan karaa Xafiiska Adeegyada Bulshada ee DSHS ama Xiriirrada Washington Connection (**washingtonconnection.org**).
- **Waa in aan ka jawaabo** codsiyo kasta ee loogu talagalay macluumaad dheeraad ah 15 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ama codsigeyga waa la diiddi doonaa waxaanna mas'uul ka noqon doonaa dhammaan kharashaadka khidmadaha ee baxa iyada oo loo marayo xafiiska bixiyahega qorsheynta qoyska.

## 10. Wakiilka Idman ee Ikhtiyaariga ah (AREP)

Magaca / Ururka ____________________

Lambarka teleefoonka ____________________

Cinwaanka boostada ____________________

Lr. Guriga ________

Magaalada ____________________

Gobolka ________

Koodhka Degaanka ____________________

## 11. Caddeyn iyo Saxiix

Waxaan akhriyey oo aan fahmay macluumaadka codsigan ku qoran. Waxaan caddeynayaa, si waafaqsan ciqaabta been-ku-dhaarashada, in macluumaadka aan codsigan ku bixiyay in uu yahay mid run ah, sax ah oo dhammeystiran inta aan ogahay.

Saxiixa Codsadaha ____________________

Taariikhda ____________________

## Ku soo celi foomka la buuxiyay Maamulka Daryeelka Caafimaadka adiga oo isticmaalaya mid ka mid ah kuwan soo socda:

- **Boostada:** HCA MEDS, PO Box 45531, Olympia WA 98504-5531
- **Telefoonka: 1-800-562-3022**
- **Fakis: 1-866-841-2267**
- Iimaylka: **apple@hca.wa.gov**